# Xeerka Gudigga 4.30.070-P

## Bulshooyinka Waxbarashada Ka hortaga Cunsuriyada iyo Ka

### I. Ujeeddo

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxaa ka go'an qaabka ka hortaga cunsuriyada iyo sinnaanta jinsiyada iyo cadaalada bulshada ee waxbarashada dadweynaha si loo hubiyo jawi waxbarasho oo ka madax bannaan naceyb iyo dhaxalka takoorida dugsiga iyo cunsuriyada habeysan ee dhammaan ardayda iyo shaqaalaha. Degmada waxay si aan leexleexad laheyn u xaqiijineysaa in nolosha dadka Madow ay muhiim tahay. Waxaan aaminsanahay xaquuqda aasaasiga ah ee sharafta bini aadamka iyo in abuurida duni loo simanyahay ay u baahantahay nidaam waxbarashdo oo si ku talagal leh u joojinaya—una dhisaya hoggaamiyayaal si loo joojiyo nidaamyada dulmiga.

Waxaan ku bilaabi karnaa nidaamka bogsiinta iyadoo loo marayo xeerarkeena iyo manhajka wax looga qabanayo dhaqanka iyo cunsuriyada habeysan. Degmada waa inay abuurtaa jawi loo dhanyahay ee muujiyaa iyo taageeraa kala duwanaanshaha jinsiyada iyo qowmiyada dadka ardaydeena iyo bulshada.

Arday walba waxay xaq u leeyihiin waaya aragnimada waxbarasho tayo sare leh, oo cadeyneysa oo xor ka ah takoor ama dhibaateynta ku saleysan jinsiyada loo arko, midabka, qowmiyada, diinta, aqoonsiga jinsiga, dooqa galmada, naafonimada, ama asalka dhalashada.

Shaqaale walba wuxuu xaq u leeyahay inuu ka shaqeeyo jawi cadeyneysa oo xor ka ah takoor ama dhibaateynta ku saleysan jinsiyada loo arko, midibka, diinta, aqoonsiga jinsiga, dooqa galmada, naafonimada, ama asalka dhalashada.

Booqde walba wuxuu xaq u leeyahay inuu ka qeybqaato jawi cadeyneysa oo xor ka ah takoor ama dhibaateynta ku saleysan jinsiyada loo arko, midabka, diinta, aqoonsiga jinsiga, dooqa galmada, naafonimada, ama asalka dhalashada.

Maamulayaasha, tababarayaasha, la taliyayaasha, ka qeybgalayaasha ardayda, iyo kuwa kale ee la xiriira howlaha barnaamijyada, iyo dhacdooyinka Degmada waa inay u dhaqmaan sida waafaqsan warqada iyo ruuxa xeerarka Degmada, sharciyada iyo qaanuunada iyo oo urur walboo iskaa wax u qabso ah, oo ay ku jiraan ururada iskaa wax u qabsiga maamulo howlaha dugsiyadoo dhan ama fududeeya jadwalka iyo barnaamijka howlaha dugsiyadoo dhan.

### II. Qeexitaano

1. “Dhacdada eexda” waxa loola jeedaa cadowtinimada uu qofku ugu muujinayo qof kale, taas oo la xidhiidha isirka, midabka, qoomiyada, diinta, aqoonsiga jinsiga, jinsiga uu qofku doorbido, naafanimada, ama asalka qaran ee qofka kale kaas oo baadhis dembi ama dacwad ku oogid aanay macquul ahayn ama aanay habboonayn. . Dhacdooyinka eexda waxa ka mid noqon kara hadal ama dhaqan lagula kaco ama ku waajahan mid ka mid ah kooxihii hore ee dadyowga.

2. "Astaanta naceybka" waxaa loola jeedaa aastaan, sawir, ama shey muujiyaa cadownimada ku saleysan jinsiga, midabka, diinta, aqoonsiga jinsiga, dooqa galmada, naafonimada, ama asalka dhalashada oo ay ku jiraan, aastaanta daldalida, aastaanta Naaziyiinta, ama calanka adoonsiga, iyo aastaamaha: ee ku jiro *Barta xogta Muujinta Aastaamaha Naceybka.* iyo bandhigooda:

a. Si macquul ah ayay ugu badan tahay inay keento khalkhal mug leh ama faragelin agab oo lagu sameeyo hawlaha dugsiga; ama

b. Waxay u badan tahay inay farageliso xuquuqda ardayda inay si buuxda u helaan adeegyada, hawlaha, iyo fursadaha uu bixiyo dugsi ama barnaamij; ama

c. Waxaa macquul ah in ay abuurto jawi waxbarasho colaadeed taas oo faragelinaysa fayo-qabka nafsiyeed iyo shucuureed ee ardayga.

3. "Hadalka Naceybka" waxaa loola jeedaa hadal qoran, hadal ah, muuqaal ah ama astaanta ku saleysan eexashada jinsiyada, midabka, diinta, aqoonsiga jinsiga, dooqa galmada, naafonimada, ama asalka dhalashada.

**III. Filashooyinka iyo Cawaaqiibaha**

Uguma dulqaadaneyno dugsiyadeena, barnaamijyada, howlaha, ama dhismaheena aastaamo walba oo naceyb ah oo carqaladeyso jawiga waxbarashada, wadato luuqad, aastaamo, ama sawirada takoorka ah; loo aqoonsanyahay inay sare u qaadaan naceybka ama dhaqanka rabshadaha; ama ay wataan hanjabaado. Kuwaan waxaa ka mid ah, laakiin kuma xadidno, dharka ardayda iyo dadka weyn, qalabyada, tilmaamaha, ama aastaamaha kale sida kuwa muujiyaa aastaamaha
naceybka. Ka reebanaanta waxaa lagu sameynayaa meesha aastaamaha lagu isticmaalo ee manhajka waxbarida iyo fursadaha kale ee waxbarasho ee la ku xiran Heerarka Gobolka Oregon oo taageero yoolalka xeerarkaan. Degmada waxay ku dareysaa fursadaha waxbarashada si ay u taageerto yoolalka xeerkaan.

Degmada waxay qaadatay dhaqamada dib u soo celinta cadaalada iyadoo aaminsan inay caawinayaan xalinta qilaafaadka oo ay u suurtogelineyso bulshooyin caafimaadan, taageero leh, oo loo dhanyahay. Sida qeyb ka ah dhaqankaan, Degmada waxay ku dadaaleysaa inay wax ka qabato dhacdooyinka eexashada iyo hadalada naceybka iyadoo la isticmaalayo qaabkaan. Intaas waxaa dheer, haddii xeerkaan ay ku xadgudbaan ardayda, Degmada waxay qiimeyneysaa haddii tallaabo edbin loo baahanyahay sida waafaqsan Xeerka Anshaxa iyo Edbinta Ardayga. Dadka weyn ee ku ka qeybgala hadalada naceybka ama dhacdooyinka eexashada waxaa quseynayo edbin iyo/ama in laga mamnuuco inuu yimaado dhismaha Degmada.

Degmada waxay mamnuucdaa aargoosiga ku aadan shaqsi walba sababtoo ah qofkaas wuxuu leeyahay eedeyn daacad ah uu gudbiyay, ka marag kacay, caawiyay, ama ka qeybqaatay baaritaan, dacwad, ama dhegeysi; oo waxaa kale oo ay ka sii mamnuuceysaa

qof walba inuu ku qasbo, cabsi geliyo, u hanjabo, ama farageliyo shaqsiga oo ku dhaqmida xaquuqo walboo lagu siiyay sida waafaqsan sharciga gobolka iyo faderaalka.

Ma jiro wax ku jiro xeerkaan oo loogu tallogalay inuu farageliyo isticmaalka sharciga ah ee xarumaha Degmada sida waafaqsan heshiiska kirada ama shatiga.

DHAMMAADKA XEERKA

Marka laga jawaabayo isticmaalka aastaan walboo naceyb ah, Degmada waxay raaceysaa habraacyada lagu tilmaamay Jiheynta Maamulka Bulshooyinka Waxbarashada Ka hortaga Cunsuriyada ee laga helo halkaan.

Qaamuuska qeexitaanada noocyada dabeecada iyo caqiidooyinka ee ah aalad ku jirto hormarinta dhacdooyinka eexashada waxaa laga heli karaa halkaan: [hyperlink to glossary]

Tixraac(a/yada) Sharciga:

ORS 659.850; ORS 659.852; OAR 581-002-0005; OAR 581-022-2312; OAR 581-022-2370

*Tinker v. Des Moines Indep. Cmty. Sch. Dist.*, 393 U.S. 503 (1969).

*Dariano v. Morgan Hill Unified Sch. Dist.*, 767 F.3d 764 (9th Cir. 2014).

*State v. Robertson*, 293 Or. 402 (1982).

---

OSBA: **ACB**

Waxaa la qaatay: 2/9/2021; La badelay 3/2023